

WAA MAXAY GANACSI

Faham guud iyo faalo kooban



Faarax Ahmed Abdi

Dabacaadi Kowaad

TUSMADA BUUGGA

Mahadnaq.....	4
Afeef.....	5
Hibayn.....	6

QEYBTA KOWAAD

Hordhac.....	7
Waa maxay ganacsi.....	10
Noocyada ganacsiga.....	12
Faiidooyinka ganacsiga.....	14
Qaababka ganacsiga.....	21

QEYB LABAAD

Caqabadaha ka hor yimaada koritaanka ganacsiga.....	25
Sababaha keena in uu ganacsigu guuleysto.....	41

BILOWGA BUUGGA

MAHADNAQ

Alle ayaa mahad leh horeyso iyo dambaysaba I waafajiyey soo saarida buugan iina fududaayey isku dubaridkiisa.

Waxa mahad ujeedinaya waalidkay kuwasoo barbaarintayda kusoo daalay gaar ahaan hooyaday saafi maxamed siciid oo aan aad ujecelahay rabi cimri dheer iyo cibaado suuban ha siiyo maca nabiyiin haka yeelo (aamin)

Way adagtahay in aad mahadnaqdo marka ay jiraan dad badan oo mudan in loo mahadnaqo waxayna qaaadanaysa maqaalo aad u fara badan

Si guud waxan mahad balaadhan ujeedinaya dhamaan asxaabta intuu buugan socday garab igu siiyey.

AFEEF

Buugan yarahan waxa uu ka dhashay fikir iyo dedaal ugub ah iyo bilowga hal abuurnimadayda qoraal sidaa awgeed inkastoo dadaal badan muujinayey iskuna howlay inaan yareeyo ceebaha kasoo bixi kara buugan haddana waxa hubaal ah in ay jiri karaan khaladaad.

Waxa akhristayaasha ka raali galinaaya wixii khaladaad ah ee buuggan ay kala kulmaan.

HIBAYN

Buugan waxa u hibeeyay qof kastoo jecel akhriska iyo qoraalka iyo qof kasta o danaynaya in uun xog fiican ka helo ganacsiga

Si gaara buuga waxaan u hibnaayey ajarkiisa iyo wixii wanaag ah uu wato iyo dheef, aabahay ahaana ganacsade mudo wakhti ku suntan ka hor, axmed cabdi shibiin qofkasta buug yarahan wax ka faaida waxan ka duraansanaya(Codsanaya) inuu u duceeyo inuu ilaahay u dembi dhaafo boos iyo makaan sare janooyinkiisa ka siiyo iyo dhamaan umada muslimiinta intii dhimatay

QEYBTA KOWAAD

HORDHAC

Marka hore badbaadiye waa ALLAAH (swt) waa isaga cida qura ee wax badbaadin kara aduun iyo akhiraba cidii diinta islaamka ee suuban u hogaaansata waa kuwa guuleystay labada daarood Rasuulkena (scw) waxa ka sugnaaday axadiis badan oo kahadlaaya habka qofku muslimka uu u ganacsan lahaa isago naftiisa aan dulmineyn walalkii uu la macaamilayo uusan dulminayn hubaal hadii qofka muslimka uu caadaysto kudhaqanka sunada nebiga (scw) ka badbadayo waxyaalo badan oo dadku maaanta la daala dhacsan yihiin xalna uu uhalaayo mashakiil badan oo so food saari kara, tubti ama toobiyihii guusha uu qaaday

Buugan sida magaciisa ka muuqata waxaa uu ka hadlaaya ganacsiga inago si hufan oo hagaagsan uga faaloon doona mawduucyo badan oo hoos imanaya Ciwaanka guud ee buuga.

Waa buug aan ugu tala galay in ay ka faaideystaan cid kasta oo ujeelan helida xog muhim oo ku saabsan ganacsiga ama fekrad ganacsi kuwaa oo an kuso qaadan doono bogaga dhexe ee buuga

Marka aad buuga akhriskiisa bilowdid wuxu faham iyo fekrad guud kasii doona ganacsiga iyo wuxu yahay sidoo kale waxan si faahfaahsan uga faaloon doona qeybaha ganacsiga si qofku uu ufahmo waxa ubilaabayo ama u rajaynaayo inu bilaabo halkee bu kaga hagaaga ama qeybtee buu ka tirsan yahay shabakada weyn ee ganacsiga oo noocyo badan.

Waxa aynu ognahay maanta dunida horumartay waxyaabaha ay horumarka ku gaartay waxa ka mida amaba gundhig u ah ganacsiga oo ay si qoto dheer ufahmeen wadamada kale ee horumarkoodu gaabis yahay sidoo kale waxa sabab unoqon karaa bulashada oo an kubararugsanayn muhiimada uu ganacsigu leeyahay.

Sida tariikhda ku xusan ganacsigu waxa usoo jiray ilaa intii ay adaaamuhu ay koonka kudul noolayeen ee xogtooda la hayo wixi kale ee ka horeyey ilaah unba ku cilmi leh hadaba ilaa wakhtigaa bini aadamka waxa usii kordhaysay cilmi uu uleeyahy ganacsiga iyo habka ganacsiga jiilba jiilka kadambeeyey uso gudbinayeen jiilkaa wixi fekrad iyo horumar buu kusi kordhinayey ilaa manta aynu joogno ee qarniga kow iyo labatanad bilowgiisa uu ganacsigu marayo heerkii ugu sareeyey habab badan ee ganacsi la ikhtiraacay.

Hadaba ganacsiga oo meertada dheer soo maray waxa jira bulsho aan xog ogaal u ahyn ama aan la socon kaalinta weyn ee bulshada uu ganacsiga ugu jiro waana sababa igu dhaliyey inaa buugan qoro.

Waxa aynu xog ogaal unahay dunida maanta dadka ugu maalqabeen san in ay yihiin dad ganacsato ah kuwaa oo bulashadooda kuso kordhiyey ganacsi miro dhal leh oo meel mar ah

Hadaba hadii aynu uso noqono somaalida iyo heerka ay ka joogto ganacsiga horeyso waxaa arin aad lagu farxo ah in bulashadeenu leedahy hido ganacsi lakiin khiibradii ganacsiga oo ubaahan dadaal iyo barasho wakhti loo huro aysan isku howlin taa waxa kaga filan daliil in aad marar badan magasho hebel ganacsigii waaka kacay ama siduu filayey umuu noqon sidoo kale inaad maqasho qof ganacsi kusoo jiray mudo aad ubadan uusan marna ganacsigiisa koreyn ama balaaranayn inuu sii yaraado ma ahe ama uu ugu dambayn uu albaabada iskugu dhufte goortu kadaalo wax isbadal ahna kawaayo.

Hadaba ganacsigu wuxu uu u baahan yahay feker iyo u kuurgal xaalado badan oo hadhow sameyn weyn ku yeelan kara ganacsigaaga curdinka ah kuwaa oo aynu qeyb badan ku xusi doono buugan hadii aad si dagan uu dhuuxdid insha alaah an rajayn doono ina aad ku faaidi doontid (Waafajinta EEBE weyne ayaa leh, dadaal baase inagu waajib ah)

Hadaba ganacsigu waxa uu khashaa fikrad ku dhalaty qof ama koox maskaxdooda. Fikradaas oo ula muuqatay in ay tahay fursad ka banana bulshada oo faaido laga samaynkaro, sido kalena lagu dabooli karo baahi kajirta bulshada dhexdeed, fekradaas waxay martaa marxalada badan oo kala duwan kahor inta aysan noqon ganacsi si toos ah ushaqaynaya.

WAA MAXAY GANACSI?

Ganacsi waxaa lagu qeexaa inuu yahay urur ama shirkad ganacsi oo ku hawlan ganacsi, warshado, ama hawlo xirfadeed. Ganacsiyadu waxay noqon karaan hay'ado macaash doon ah ama waxay noqon karaan ururo aan macaash doon ahayn oo ka shaqeeya si ay u gutaan hadafka sadaqada ama ujeedo bulsho.

Ereyga "ganacsi" sidoo kale waxaa loola jeedaa dadaalka abaabulan iyo waxqabadyada shakhsiyaadka si loo soo saaro loona iibiyo badeecadaha iyo adeegyada si faa'iido loo helo. Ganacsiyadu waxay u dhexeeyaan miisaan ahaan shirkad gaar loo leeyahay iyo shirkad caalami ah. Dhowr xariiq oo aragti ayaa ku hawlan fahamka maamulka ganacsiga oo ay ku jiraan habdhaqanka abaabulka, aragtida ururka, iyo maaraynta istiraatiijiyadeed, ugu dambayn ganacsigu waa fal ama dhaqaaqkasta oo lasameeyo iyadoo ujeedadu tahay in faaido laga gaadho ama gudasho hadaf loogu adeegayo bulshada

Sidoo kale waxaa uu noqon karaa talaabo uu qof kaligii qaadayo ama koox dad ah ay wada fulinayaan iyago hal ujeedo wadaaga taaso ah la hirgaliyo ganacsiga faido leh micnaha waxa weeye alaab aad soo iibsatay ama aad soo saartay ama adeeg aad sammaysay inaa aad lacag kadhaliso owgeed Hadii aynu soo qaado qaarka mida xeel dheerayaal ganacsiga waxay ka yiraahdeen su aashan aynu ku furnay maqaalkan

1. **Dicksee** wuxuu ku qeexay ereyga ganacsi: “waa waxqabad ay dadku ku sameeyaan faaido & hanti sidoo kalena ay ku daboolaan baahi ka jirta bulshada dhexdeeda”.

2. **Stephenson** wuxuu ku qeexay waa “wax-soo-saarka ama soo-iibsashada iyo sii-iibinta ee badeecadaha iyadoo laga samaynayo faa’iido & hanti lagana qancinayo bulshadaas baahidooda ku aadan waxaas laga ganacsanayo”.
3. **Lewis Henry** wuxuu ku qeexay: waa “dhaq-dhaqaaq bani-aadam oo ay ujeedkiisu tahay si ay u helaan hanti, waxayna soo ‘iibsadaan/saaraan’ badeecad kadibna waa sii iibiyaan iyagoo faaido saaranaya”.

Hadaba sida aynu ka arkayno qeexida ay sameeyen xeeldheerayashu halka ay u biyo shubanyso ganacsigu inuu yahay fal ama ficil loo baahan yahay qofku inu ku dhaqaaqo si u uga dhabeeyo kaliya ma aha qofku in uu fekrad maskaxdiisa ka guuxaysa isku maweeliyo uu yidhaahdo ganacsi baa samayey isagoo aan la imaan talabooyin isdaba yaal si ay uhirgasho fikrada.

Ganacsigu waxa uu ka mid yahay culuumta lagu barto jamacada dunida meelkasta ay ku yaaalan waxana badana ardayda looga dhiga qaab oraah taxan (**theory**) iyado ardaygu uusan isku taxaluujin in uu ubadalo oraahda taxan, xirfad (**skill**) halkaa ay ka dhalato caqabad ah in dhalinta soo baratay cilmiga ganacsiga aysan saamayn weyn ama midii loo baahna bulshada kuyeelan oo ay xirfado kale ay ku maweeliyan nafta

Hadaba si caqabada looga baxo waxa muhim ah in ardayda dhigata jamacada iyo xarun kasta oo lagu baranaayo cilmigan si xeel dheer loo fahamsiiyo ganacsiga, xirfad ganacsina loogu daro si ay bari u kaafiyan naftooda bulshadana kaalin muuqata uga qaatan

NOOCYADA GANACSIGA:

sida caluumta kale ee la barto ay u leedahy noocyo iyo qeyb kala duwan ayaa ganacsigu uu u leeyahay noocyo iyado uu qof kaga hagaagayo nooc ka mida siduu ugaadho yoolka ganacsi uu leeyahay Ganacsiga guud ahaan waxaan u kala saari karnaa afar nooc oo waaweyn iyadoo laga tixraacayo shaqada ay bulshada u qabanayaan Afartaas nooc waxay ka la yihiin:

Ganacsi adeegga bixiya: noocani waa ganacsi bixiya adeegyada, shaqooyinka u baahan xirfadaha & aqoonta. Waa nooca shaqada uu kuu qabanayaa ay tahay wax lama taabtaan ah [intangible]. Taas bedelkeeda kuu fududeynaya in ujeedo aad lahayd aad gaarto adigoo wax aad taaban karto dareen ahaan aan gacanta lagu gelayn. Tusaale waxaan u soo qaadan kartaa; Bangiyada, goobaha dumarka lagu qurxiyo[Salons], shirkadaha talooyinka bixiya, shirkadaha isgaarsiinta, sida Golis, Hormuud ama Somtel oo kale, & sidoo kale shirkadaha safarada. Mid walba ujeedo aad lahayd ayuu kuu fuliyay, laakiin, midna wax laa taaban karo dareen ahaan kuma siin.

Ganacsiga badeecada ah: Noocani waa ganacsiga lakala iibsado badeecadaha looga baahan yahay bulshada dhexdeeda. Ganacsigan waxaa lagu kala gataa alaab aad taaban karto, muuqan karta ama aad arki kartid; si toos ah. Badeecad [tangible] ah ayaa la kala iibsanaya. Tusaale waxaan u soo qaadan karnaa; shirkadahasibidhka ama qalabka dhismaha, shirkadaha bagaashka, kuwa qalabka korontada ama shirkadaha khudaarta, kaluunka ama hilibka [xoolaha] ka ganacsada. Labadan nooc ee sare waxay ku kala duwan yihiin waa in midna ay kaaa gadayso adeeg [intangible], midna ay kaa gadayso badeecad [tangible].

Tusaale waxaa Inoogu filan: shirkadda ka ganacsata iibinta qalabka dhismaha hadaad wax uga baahato waxaa ka soo gadanaysaa alaab aad taaban karto dareen ahaan, sida alwaax, sibidh ama jiingad, laakiin hadad u tagto shirkad dhismaha ka shaqaysa ee aad ka dalbato in ay guri kuu dhisto,

waxay kuu qabanaysa adeeg ku xiran xirfadda dhismaha, alaabtii aad ka soo gadatay shirkada qalabka dhismaha iibisa ayay xirfada ay leedahay shirkadan dhismuhu kaaga soo saaraysaa gurigii aad u baahnayd.

Ganacsiga wax-soo-saarka ah [warshadaha]: Kani waa ganacsi ku saabsan wax-soo-saarka warshadaha. Iyagu waxaa ay soo saaraan waxyaalaha suuqa lagu ka la gato. Marka hore waxay keensadaan alaab ceerin [raw materials] waxayna u badalaan wax la manaafacaadsan karo bulshada dhexdeeda. Waxa kaliya aya u baahanyihiin si ay alaabtaas u keenaan suuqa waa in ay keensadaan warshad, alaab ceeriin, shaqaale & kharashaad socodsiiya shaqada meesha ka soconaysa. Tusaale; warshadaha sameeya kaluunka qasacadaysan – waxay marka hore keensanayaan warshadii kaluunka samaynaysay, alaabtii ceernayd sida; kaluunkii oo ay badda ka soo dabanayaan, saliidii, gasacadihii lagu guri lahaa IKK, & shaqaale xifadleyaal ah si ay kaluun qasacadaysan u-soo-saaraan kadibna ka iibiyaan cidii u baahan jumlo ahaan [badanaa].

Ganacsi isku dhaf ah: Noocani waa ganacsi ka koobnaan kara dhamaan sadexda nooc ganacsi ee aan kor kusoo xusnay, ama labo kamid ah. Tusaale; shirkad ganacsi oo adeeg bixisa, badeecona gadda, labadaba. Ama mid sadexdaba kulansatay oo warshad wax-soo-saar leh, alaabtaas ka sii ganacsata, adeegyana bulshada u qabata.

Noocyada kala duwan ee ganacsiga hadii aynu fahamnay waxa muhiim ah qof rabaa inuu bilaabo ganacsi in uu aad xog ogaal u yahay nooc uu bilaabayo xirfadna uu leeyahay si uu uga miro dhaliyo, waxa dhici karta in uu ganacsadahu uu awood u leeyahay in uu bilaabo labo nooc ama ka badan, oo isku dhafan ama kala madax banana.

Sidoo kale waxa muhiim ah markaa ad dooranaysid nooc ganacsi aad ku salaysid deeganka iyo siduu uga socon karo ganacsigu, bulshaduna ay diyaar u tahay in ay kuso dhaweyso gacmo furan ganacsiga bilowga ah baahina u daboolayo.

FAIDOOYINKA GANACSIGA

Ganacsigu waa mid ka mid ah waxqabadka ugu muhiimsan ee aadamaha. Kaalin muhiim ah buu ka ciyaara horumarka dhaqaalaha qaranka iyo sare u qaadida heerka nolosha dadka.

Hadaba si aynu uga gooyono si wacan aynu ufahamno faidoyinka ganacsi waxa aynu uqeybin qeyb kala duwan iyo sida uu door muhiim ah uga ciyaaro

Faaidooyinka ganacsiga uu uleeyahay dowlada

Mid ka mid ah sababaha ugu waaweyn ee ganacsatadu muhiim ugu yihiin dhaqaalaha waddanka ayaa ah inay lacag cashuur ah ku biiriyaan dawladda, taas oo bixisa maalgelinta adeegyada kala duwan ee dawladda ee ay bixiso dawladda dhexe, gobolka, iyo dawladaha hoose

Ganacsiyadu waxay kaloo gacan ka geystaan aqoonsiga bulshooyinka iyo quruumaha. Booqashada Steamboat, Colorado waxay leedahay muuqaal ka duwan tan booqashada Orlando, Florida. Adeegyada ganacsiyada ay siiyaan bulshada maxalliga ah ayaa qaabeeya isku-xirnaanta dadka ku dhex nool bulshadaas waxayna xitaa saameyn ku yeelataa noocyada dadka u socdaala meelaha qaarkood. Marka la eego miisaanka ballaaran, tani waa run heer qaran. Dadku waxay u safraan Isutagga Imaaraatka Carabta, ugu yaraan qayb ahaan, maxaa yeelay waddankaasi wuxuu dhisay saldhig ganacsi oo ka duwan kan Australia ay leedahay. Dhaqaalaha dalxiiska ee ummaddu wuxuu ku tiirsan yahay ganacsiyada ka jira waddankaas dhexdiisa si ay u soo jiitaan dadka safarka ah - ka dibna ay u soo saaraan dakhli dheeri ah bulshada gudaha iyo tan dadka safarka ah

Ganacsiyadu waxay soo saaraan balaayiin doolar oo canshuur ah, shirkad iyo shaqsi ah, oo lagu bixiyo taageerada adeegyada dowladda. Sannadkii 2019, sida laga soo xigtay Adeegga Dakhliga Gudaha ee aduunka shakhsiyaadku waxay bixiyeen \$ 1.718 tirilyan oo canshuuraha shaqsiga ah. IRS waxay ka soo ururisay \$ 1.243 trillion canshuuraha mushahar bixinta, oo

ay kujirto (**Social Security iyo canshuuraha Medicare.**) noocyo kamida cashuuraha dunida layska qaado , Shirkaduhu waxay bixiyeen \$ 230 bilyan oo kale canshuuraha shirkadaha. Canshuurahaas waxaa la siiyaa dowladda federaalka. Kuma jiraan dakhliyada dheeriga ah ee dawladaha hoose iyo dawladaha hoose ee ay ka ururiyaan shaqaalaha iyo ganacsiga. Ganacsi la aan, dawlada dhexe, dawladaha hoose, iyo dawladaha hoose aad ayey u xadidnaan lahaayeen dakhligooda.

Marka, ganacsiyada sidoo kale waxay saameeyaan saldhigga canshuuraha. . Joogitaanka ganacsiyada ayaa si weyn u saameyn kara waxyaabaha sida fursadaha waxbarasho ee ka dhex jira meel kasta oo la siiyo. Haddii bulshada maxalliga ahi aysan lahayn ganacsiyo (ama aad u yar) ganacsi, sidoo kale waa ka maran tahay ilaha dhaqaalaha ee looga baahan yahay inay adeegyo ugu fidiso dadkeeda. Dakhliga ka soo xarooda ganacsatada canshuuraha bixiya waxay gacan ka geysaneysaa hagaajinta waddooyinka, dayactirka iskuulada, iyo horumarinta adeegyada bulshada.

Bulsho leh ilo badan ayaa inta badan ka qaayo iyo qiimo badan dadka doonaya inay halkaas ku noolaadaan, taas oo u xaqiijiso qiimaha guryaha iyo guryaha dadka degan. Haysashada beelo ganacsi oo la isku halleyn karo oo ka jira waddan oo dhan sidaas darteed ugu dambeyntii waxay ilaalinaysaa maalgashiga guryaha ee milkiileyaasha guryaha waxayna kordhisaa dareenka qaran ee isku-kalsoonaanta Waxa odhan karnaa dowlada waxa asaas u ah ganacsiga oo ay si toos ugu tiirsan tahay hadii uyaraado ganacsi kajira gudaha wadanka sidoo kale waxa yaraanaya dakhliga soo galaya dowlada waxayna sababta in waaxyaha dowlada oo dhan ay howl gab noqdaan ama uu gaabis weyn kudhaco marka waxa muhiim ah dowladu in ay il dheer u laahato ganacsiga iyo hormurintiisa.

Faaidooyinka ganacsiga uu uleeyahay bulshada

Ganacsiyadu door weyn ayey ku leeyihiin dhaqanka iyo bulshada guud ahaan. Sidoo kale waxay gacan ka geystaan abuurista hal-abuurnimo iyo inay sameeyaan horumar farsamo oo muhiim ah.

Ganacsigu waxa uu ka qeyb qaata shaqo abuurka bulshada, iyado hadii ay bulshadu ay leedahay goobo badan oo ganacsi ay katurjumayso in bulshadaa ay shaqo abuur fiican leedahy badana waxa dhacda wadamada horumaray marka ay rabaan in ay yareeyan shaqo la aanta wadanka kajirta meelaha ugu waweyn ee il dhaqaale bulshada looga sameeyo waa ganacsi

Wadamada wali soo koraya gaar ahaan wadamada bariga Afrika dhibaataada ugu weyn dhalinyarda haysata waa shaqo la aan waxad arki ama aad maqli jaantus magaalo oo dhalinyarada shaqaysa ay aad u hooseyan hadaba hadii dhalinyarada lagu baarurijin lahaa lagana caawin lahaa sameynta ganacsi isbedel weyn oo lataaban karo aay ku imaan lahaa bulshadaas ganacsiga oo dardar la galiyaa wuxu kaalin weyn ka qaadanaya in xooga iyo maskaxda is weheshaday ee dhalinyarada ay ka faaideystaan kuna maareeyan noloshooda kana badbaadan aafoyin fara badan ee so wajihi lahaa sida tahriib ,dhaca ama boobka,ama maandooriyaasha oo ay isku maweeliyaan

Sida an ciwaanki hore ugaso hadalnay cashuurta waa isha ugu muhiimsan ee dhaqaale ee dawlada ay ku tiirsan tahay hadaba bulshada samaysa ganacsi fiican waxa ay qeyb weyn ka qaadanayan geedi socodka dawlada, halkaa oo ay

dawladu ugu fulinayso arimo aad ugu muhiim ah sida sugida amniga amniga waxa suga ciida loo tababaray kuwaa oo mushaharkooda dowladu bixiso hadaba mushahaarkaas wuxu ka yimi cashuurta laga qaado bulshada goobta kusugan hadii ay dhacdo in bulshadu ay ka gaabsato ganacsiga oo aysan ilo dhaqaale xoogan ay lahayn waxa adkanaysa inay cashuur bixiyaan

taana waxay sababysa in sugida amniga uu yaraado Waxa odhan karaa ganacsiga wuxu qeyb lixaad leh ka ciyaaray sugida amniga ee bulshada. ilaahy sareeye weynaaye , aadamaha waxa uu ku abuuray baahiyo faro badan kuwaa oo aan xad lahayn qofka intuu noolyahay dunida kudul socdo uu rabo waana baahiyo isdaba yaal waxaa kamida baahida cunada , baahida dharka ,baahida dawo oo qofku hadii uu xanuusado ama jiro haleesho uu tabayo dawo tayo leh oo uu cudurkiisa kula tacaalo inuu helo hadaba hadii bulshada ama qofku uu helo waxa uu ku daboolo baahiyaha in uu helaayo xisilooni iyo dagnaansho waxa shaki kujirin in ganacsi uu qeyb weyn kaqaato daboolida baahiyaha bulshada si ay uu helaan dagaananshiyo iyo xisilooni ganacsiga bulshada waxa uu gaarsiya heer qofku maqsuud kunoqdo degaankiisa uu waxkasta ka helaayo sidoo kale hadidiilo galiso inuu isna dhinac ka bilowdo ganacsi uu naftiisa kudabaro.

Bulshada hadii aysan lahayn ganacsi badan waxa yaraanaysa dagnaanshiyaha bulshadaas waxana dhacaysa in qofku uu degaano kale uu safro markasta oo u rabo waxa degaankiisa kamaqan faaidooyin badan buu ganacsigu uu leyahay bulshada waxa kamida soo jiidashada shacabka raba degaan ay kunooladan , hadii magaalo ganacsi badan iyo mid ganacsigeedu yar yahay is barbar dhigto waxa badanaa dadku uu iishan ama ay jecel yihiin in ay degaan mid ganacsigeedu fiican yahay waay heerka kunoolaanshaheedu wuu wacan yahay bulshada ganacsiga xooga saarta oo wakhti badana kuqaadata ganaciga mid wax iibinaya iyo mid wax laga iibsanayo waxa ay ku foogan yihiin dantooda iyo horumarinta naftooda iyo tan degaankooda hadii aysan bulshada helin ama lahayn ganacsi waxa imaanaysa ina ay ku mashquulan arimo kale dhibaato u keeni kara sida colaada dhaca iyo boobka iyo waxyaalo kale oo faaido ugu jirin sida tariikhda ku suntan wakhtiyadii hore soomaalida ganacsigu uu yara, o uusan kajirin goobaha badankood waxa bulshadu ku mashquuli jirtay guluf iyo colaad joogto ah dhac iyo boobka xoolaha nool waayo dadku ma aysan lahayn mihnad ay ka shaqeeyan am il dhaqaale ay ka helaan, nafta ayaa u qurxisay in ay camal kadhigtaan dhaca iyo boobka hubaal hadii uu jiri lahaa

ganacsi waxa yaraan laha falaalkaa ay bulshadu samaanka kujirtay waxa ayna booski dhaca iyo boobka kubadali lahaayen shaqayso maal tabco waxa muuqata in bulshada horumaray uu ganacsi gaadhsiiyey heerka ay joogan oo ah bilic iyo soo jiidasho ka muuqata degaanadooda halka ayba dhacdo in loo dalxiiso goobo ku waal deganadooda ganacsiga waxa uu bulshada uu leeyahay faidooyinka aynu soo sheegnay iyo kuwo kale aan halkaan laguso wada koobi Karin waxa muhim ah hadii lala rabo bulsho in ay horumarto waa in dardar xoogleh lagaliya kobcinta iyo bilaabida mashariic ganacsi.

Faaidoyinka ganacsiga uu uleeyahay qofka

Faaidoyinka uu ganacsigu qofka uu leeyahay waxa kamida in uu qofku maareynta iyo dabarida axwashiisa xor uhaado waayo waxa ognahay qofka hadii uu shaqaale yahay in uu ku tiirsan yahay mushahar ama mushqaayad uu qofka ama shirkada uu shaqeeyo siiso.

Hadii ay dhacdo in shaqadii uu katago waxa adkaan qofka in uu mareeyo baahiyihiisa waxa ay ku khasbaysa in uu shaqo kale raadsado meertadaasna uu qofku jiro isla markaa hadii qofku awood dareeyo da, a ama cudur soo foodsaray ay sababtay waxa ay noqon qofkii inuu il dhaqaale uu ka helo ay adkaato waayo shaqadii uu hayey waxa lagu badalaya qof kale kaas awood uu leh inuu guto hadaba si mashaqadaa uu u qofku ugasii tababushaysto waxa wacan in uu ganacsi yeesho inta uu itaalka badan iyo maskaxda uu uhayo kobciyo si uu hadhow ugu aayo sidoo kale qofka ganacsiga leh wuxu xor u noqon maareynta wakhtigiisa iyo maalkiisa wayo qofka isaga ayaa awood u leh in uu qoondayo xiliga uu ganacsiga ka howl galaayo iyo xadiga lacageed uu galinaayo isla markaana maamulka cida uu shaqalaysiinayo isaga ayey ku xiran tahay.

Ganacsiga wuxu mulkiilihiisa uu yeela haybad iyo sharaf isago qofka daremayo in kaalin muhim kudhex leeyahay bulshadiisa buuxinta baahiyaha soo food saara bulshada uu qeyb weyn ka qaadan karo sida bixinta cashuuraha ,qaaranka lagu gargaarayo shacab degaanka inta tabalaysan ,bixinta sakada oo qeyb muhim ugu jarta bulshada muslimka iyado lagu

gargaaro dadka maskiinta hadaba ganacsigu wuu kor uqaada qofka meeqanka uu ka joogo dadka uu la nool yahay.

Diinta islaamka waxyaabo waajib ku ah qof muslimka inuu sameeyo ay fartay baa jira kuwaaa oo qeyb kamida qofka haduu maal ama hanti leeyahy lagu xiray waxana kamida sida xajka,sakada ,iyo sadaqa iyadoo sadaqada qof aan xadi lagu xirin ee intuu awoodo uu bixin karo hadaba hadii uu qofku u sameeyo cibaadooyinka uu ujar iyo fadli dheerad ilaahy weyna o wanaagsana uu balan qaaday marka ganaciga wuxu ku sahlaya in aad shaqaysatid xoolo xalaaala oo aad xajka ku aadid ,sako kabixisid iyo sadaqada si aad EEBBE weyne ugu dhawaatid fadli iyo darajo sare aad heshid.

QAABABKA GANACSIGA:

Ganacsiyadu si kastooy kala ujeedo ama nooc u yihiin, waxaa jira qaabab kala duwan oo uu mid walba gaarkiisa u ahaan karo, midkasta waxaa uleeyahy sifooyin iyo sharuudo uu kusocdo uuna kaga soocan yahay qaababka kale waxa ayna ku xiran tahay doorashada qaabka ganacsi qofku uu bilaabay ama uu rabo in uu ku biiro labo shay kuwaa o kala ah heerka cilmi ama garasho ee uu qofku uu leeyahay qaabka iyo xadiga maaliyad ee uu qofku awood.

Qaababka midkasta saameyn taban iyo kuwo togan baa waa ay leeyihin waxaana laga rabaa qofka doonaya in ubilaabo ganacsiga In uu miisaamo kadib midka samayntiisa togan (wanaagsan) badato uu bilaabo qaababka tiro ahaan way badan yihiin lakin waxa aynu kasoo qadanayna sadexda ugu muhiimsan aadna looga isticmaalo wadankeena kuwaa oo kala ah:

Ganacsi hal hantiile leh

Ganacsiga qaabkan u jiraa waa ganacsi uu hal qof leeyahay. Waxaa uu ahaan karaa ganacsi adeeg bixiya, warshada ama ganacsi badeecad ka shaqeeya, laakin hal qof ayaa leh. Mas' uuliyadiisa dhamaan halkaa qof ayay dhakadiisa tahay.

Hadii uu kaco ama faaido, labadaba isaga uun baa leh.

Ganacsigan waxa afqalaad ee lagu yiraada [Sole proprietorship] waana sida ay ku dhigtaan ardayda jamacadaha ama macadyada lagu barto ganacsiga dhigta ganacsiga waa nooca ugu badan bulshada dhexdeeda calaamka 95% tiro ahaan kartaa ay ku foogan ka shaqeynta ganacsigan isla markaana kala soo baxa nolol maalmeedkoda ganacsigan dhinac wanaagsan oo badan uu leeyahy ayka mid tahay asaaska iyo bilaabida ganacsi hal hantiile ma adka waayo miisaniyad aad ubadan ku kici mayo sidoo kale uma baahna dayn weyn in uu mulkiilahu soo qaato si uu ugu socod siiyo kaliya waxa kufilan xadi lacageed oo kooban oo uu uqoondeeyo in uuku bilaabo faaidoyinka ganacsi hal hantiile ah waxa kamid ah malaha xadi cashuur oo badan oo laga qaadayo waxa dhacda dowladu in ay siyaasad ku jaangeyso in ganacsi curdinka ee hal hantiilayasha ah aan cashuur laga qaadin si ay uu dhiiri galiso bulshada ama xadi yar oo kooban laga qaado taasna waxa kayaraan culayska mulkiilaha iyo welwelka uu kaqabay cashuurtu in ay dhidibada usiibto

Ganacsigiisa bilowga ah sidoo kale ganacsi qaabkan faaidada kasoo baxda waxaa si toosa uqaadan mulkiilaha ganacsiga iyado aysan jirin saami qeybsi cidkale.

Hadii aynu kasoo hadalnay faidooyinkiisa waxa muhim ah in aan waxka sheegno dhibaatooyinkiisa si cida doorbidaysa bilaabada ganacsi qaabkan ah ay ugu baraarugsanato, ganacsi hal hantiile waxa ugu weyn ee qofka bilaabaya soo food saara waa culayska shaqada iyadoo ay muhim tahay ganacsaduhu in uu saacado badan shaqeeyo si uu u socod siiyo ganacsiga halkaa oo aysan jirin qof howsha laqabsata oo uu qanacsiga ku haleeyo sidoo kale culays yada soo foodsara ganacsiga hal qof bilaabo waxa kamida

aqoon dhan kale uga imanaysa oo qofka ka saacida socodsiinta ganacsiga oo an jirin tusaale waxa laga yaabo in mulkiilahu uu ku fiican yahay suuq geynta balse uu u baahna qofka caawiya maareynta maaliyada(lacagta) halkaa caqabada kunoqoto qofku in uu si wacan uu maareyn wayo lacagtii Hadaba ganacsiga qaabka waxa wanagsan qofku goortu rabo in uu bilaabo in uu sameeyo xog aruursi iyo uu kuurgal in uu yahay mid kuhaboon isaga awoodna uu u leeyahay in uu hirgaliyo yoolkii uu ka doonayey uu gaaro

Ganaci dhowr hantiile leh qaabkani waa ganacsi ay wadaagaan dhowr qof. Nooc ahaan kii uu doono ha ahaade, ganacsigan dad badan baa wadaaga. Halka kii hore uu hal qof lahaa, Kan dhowr qof oo kala duwan baa wadaaga. Laakiin sida kii hore Mas'uuliyadiisa dhamaan dhowrkaas qof ayay dhakadooda tahay. Hadii uu kaco ama faaido, labadaba iyaga uun baa leh. Ganacsigan waxa afqalaad ee lagu yiraada [partnership] waana sida ay ku dhigtaan ardayda jamacadaha ama macadyada lagu barto ganacsiga dhigta Hadaba ganacsigan samayn taban iyo mid togan ba wuu leeyahay hadaynu kasoo qaadano dhowr ka mida faaidoyinka ganacsiga dhowr hantiile, waxa kamid ah in samayntiisa ama bilaabidiisa ay fududahy sidii kii hore waayo isagu uma baahna xeerar weyn ee sharci dowli balse waxa ay ku xiran tahay hadba sida ay isku fahmaan dadka kooban ee wada bilaabaya ganacsiga heshiis iyaga ugaara ay qortaan sidoo kale faaidooyinka ganacsigan waxa kamida sida aynu hore usoo sheegnay hadii khasaaro yimaado ama xaalad adag soo wajahdo ganacsiga waxa si siman uqaybsanaya xubnaha ku shiraakoobay ganacsiga oo culayska marka kuma kaliyeysanayo hal qof.

Ganacsiga hal qof waxa dhiman khibrad iyo awood cilmi oo badan waxa laga yaaba qofka hal hantiile uu ku wacan yahay maareynta iyo muulka balse uu suuq geyn fiican samayn Karin sidoo uu kudaalo xakamayn xaalado badan oo ganacsiga saameyn kuyeelan kara balse hadii xubnuhu ay badan yihiin

waxaa wax ay isku biirsan ama isku dari awoododa cilmi, caqli iyo cadud si ay ganacsiga heer fiican u gaarsiiyan.

Qeyb kamida saameyntiisa dhanka taban(waxyeelo) ganacsiga waxa yaalaha ugu badan ee uu dhibta uu leeyahay hadii wadankeena laga eego waa is faham waaga iyo khilaafta joogtada ee soo kala dhex gala xubnaha ku midoobay ganacsiga iyago markii hore aan la qorin heshiis dhexyaal u ah ama nootayo sharci oo dib loogu laabto si loo xaliyo khilaafka.

Badana waxa dhacda in ganacsi dhowr hantiile lagu saleeyo aqoon sida labo asxaab ah ama rafiiq kuwo ehel ah midaa way wacan tahay balse markay runta timaado oo ganacsiga soo wajaho xaalad adag waxa dhalanaya khilaaf iyo in afkaartii lagu kala duwanaado, hadaba sida khilaafka loo xaliyo waa in lasameeyo warqad sharci oo koobaysa dhaman heshiisyada ay wada galaan xubnaha wadaaga ganacsiga.

sidoo kale ganacsiga waxyaabaha soo wajihi kara waxa kamida hadii dadkii kuwada jiray qeyb ama mid kamida tii xaq ahayd utimaaado oo ugeeriyoodo waxa dhici karta in ganacsiga joogsado ama qeybtiisa ay qaatan ehelka qofkaa, sidoo kale hadii qofka wuu dhimir ahaan u dhaqaaqo(waalida) waxa iyana sababaysa in ganacsiga qeybtiisa la wareegan ehelkiisa ama ay kala baxaan shurkaashada.

Hadaba ganacsiga dhowr hantiile hadii aynu kasoo hadalnay qeyb kamida faaidooyinkiisa iyo waxyeeladiisa waxa wanaagsan dadka raba in ayku midooban in samayeen ganacsi ka dhexeeya in ay sii odorasaan xaalado badan oo gadaal kasoo bixi karaa faaido iyo khasaaro hadii uu ganacsigu galo ay cadahay sida loo qeybsan karo, habka go,aan qaadashada ,hadii xubin kale lagu soo darayo ganacsiga habka loo marayo iyo heshiisyo kale oo badan oo laabahan yahay in loo qoro si loo yareeyo khilaafadka maahmaah baa ahayd(wixii qoran baa quruumo ka hara) iyo (wixi indhihu

arkayaan buu afkuna gooya) hadiii heshiis qornayn qofkasta wuxu rabo buu ku andacoon oo kudoodaya

Ganacsi madax banaan (shuraako) ganacsigani wuxuu leeyahay qaab kala saaraya hantiilayaasha iyo shirkada. Shirkada, sharci ahaan, waxaa loo tixgelinayaa sida qof nool oo kale oo ka madax banaan hantiilayaasha. Hadii ay shirkadaasi gasho wax denbi ah, sharci ahaan lama xukumayo shakhsiyaadka leh ganacsiga, balse waxaa la xukumayaa shirkada lafteeda. Saamileydu waxay doortaan maadax maamul [Board of Directors], iyaga ayaa shaqada socodsiiya, saamileyaashu waxay ka xisaabtamaan uun faaidada keliya iyo bedelida madaxda maamulka hadii loo baahdo. Guud ahaan sadexdaa qaab baa ugu caansan ee ay shirkaduhu uga jiraan aduunka. Waxaa jira noocyo kale, sida ganacsiga deyntiisu ka xadidantahay hantiilaha, oo hadii shirkadaas deyn lagu yeesho waxaa loo raacayaa shirkada hantideeda oo keliya, hadii guud ahaan hantida shirkadaasi ay iska bixin kari weydo deyntaas, hantida kale ee hantiilaha looma raacayo.

Ganacsigan waxa afqalaad ee lagu yiraada [corporation] waana sida ay ku dhigtaan ardayda jamacadaha ama macadyada lagu barto ganacsiga dhigta ganacsiga tiro ahaan kuma badna wadamada Africa waayo samayntiisa baa wakhti iyo miisaaniyad aad ubadan ubaahan sidoo kale ganacsiga waxa laga yagleela degaan amnigiisa iyo shacabka degaanka laysku haleyn karo waayo khasaarihiisa waa mid aan si fudud loga soo kaban Karin waxa laga yaaba qofku ama koox in ayku darsaadan xadi lacag ay wakhti badan aruurinayeen hadii khasaaro yimaado ama uu kaco niyad jab balaaran bayku keenaysa shacabka kuxirnaa iyo dowlada.

QEYBTA LABAAD

CAQABADAHA KA HOR YIMAADA KORITAANKA GANACSIGA

Waxyaabaha is hortaaga koritaanka sharikaadku waa faro badan yihiin, sida ay u badan yihiin waxyaabaha dhiirigeliya korintaanka iyo koboca ganacsiyadda, lakiin waxay ganacsiyaddu ku kala duwan yihiin u nuglanshaha dhimashada. Dhimashaduna, in kastoo, ay soo wajahdo sharikaadka oo dhan, haddana, sida la xaqiijiyay waxay aad ugu badan yihiin shirkaadka yaryar marka loo eego shirkadaha waaweyn.

Waxa la yidhahda 1000 shirkaddood wax ka yar 40 ama 4% cimrigoodu ma gaaro 10 sano. Sidoo kale, in kastoo dhimashadu niyad jab, saamayn dhaqaale iyo mid sumcadeed ku keento qofkii aasaasy shirkadda, haddan, sida dad badani yidhadan. Dhimashadu waxay sixitaan ku samaysaa suuqa ganacsiga. Dhimashadu waxay dhaqaalaha ka leexisa meelaha faa'idadoodu yartahay waxaanay u leexisa meelaha faa'idadoodu badan tahay.

Waxaaba la yidhahdaasoo afmeeridda sharikaadka dhaqaale ahaan suuqa iyo tartanka ku sii jiri karin waxay u fiican tahay dhaqaalaha waddanka iyo mujtamaca, WAAYO, waxay madax banneeyaan hanti, aqoon iyo waaya'aragnimo aan si fiican looga faa'iidayaan markii hore.

Marka laga hadlayo eray bixinta loo isticmaalo dhimashada waxa loo kala saara noocyo kala duwan sida haddii shirkaddu tahay mid qof leeyahay (sole proprietorship) dhimashadooda waxa la yidhahdaa way kacday, Suuqay ka baxday, ama waa musaliftay. Halka sharikaadka xudduud leh (Limited) la yidhahdo way dhimatay (Death). Dhimashada shirkadaha waxa lagu qeexa: waa soo afmeerista lahaansho shirkadeed.

Waxa mihiim ah dhimashadu maaha oo keliya khasaare alaabo/adeeg oo shirkada ku yimid, lakiin waxa kale oo ay noqota mid kaga yimid dhinaca tartamayaasha, dhinaca shirkadaha alaabta ka soo iibiya ama asbaabo kale oo khaas ah sida qofka oo xanuusta ama gabooba.

Bal aynu isku dayno si kooban in aynu u taxno arrimaha ugu waaweyn ee keena dhimashada ama fashilka shirkadaha ganacsiga.

Aqoondarro dhanka suuqgeynta ah.

Suuq geyntu waxay door muhiim ka ciyaarta geedi socodka ganacsiga iyo inuu noqdo mid macamiil badan oo ku xiran hela, hadaba waxa jira ganacsiyo badan oo iska indho tira dhinac suuq geynta iyago kusalaynaya inaysan muhim u ahayn taasi waxay keenta in uu ganacsigu guulahii laga rabay uu gaari waayo labo hab ugu weyn ee ku iiman karta suuq geynt la aanta ganacsiga waa, tan kowaad waa qofki ganacsiga hal abuuray oo aan aqoon fiican u lahayn suuq geynta isla markaana aan door bidin ama doonayn inu shaqaaleysiyo qof u suuq geeya ganacsigiisa arintaa waxay caqabad kunoqota koritaanka ganacsiga iyo in bulshadu ka war hesho ganacsiga iyo adeega uu bixiyo, tan labaad waa hadii ay ganacigu leeyahay dad u suuq geeya balse aan xoga saarin rabitaanka macamiisha una kuur galin inay ogaadan bulshada waxay danayso hadii aynu u fiirsano deeganada aynu ku nool nahay waa ay yartahay inaad aragto ganacsi xooga saaraya dhanka suuq geynta waxa ayna arintaas sababtay in ganacsiyo badan ay wakhti kooban ku kacaan ama iyago mudo badan jiray aysan bulshadu xog ogaal u uhayn.

wakhti aynu joogno wayka sahlana tahay dhanka suuq geynta xiliyadii hore waayo waxa badan aalada is gaarsiinta bulshada iyago mareegta tabiya xayeesyiinta ay bulshadu si fudud ku gaarsin karaan ganaciga soo kordhay iyo faaidooyinkiisa waxa mihiim ah mulkiilaha ganacsiga inuu u doorto hab xayeesyiinta ku haboon ee u ganacsigiisa ku suuq geyn karo si uu u helo

macamiil badan oo xog ogaal u ah ganacsigiisa ha ahaaden kuwo degaanka kula nool ama kuwo degaano kale ku nool oo udalab gaarsiin karo.

libka oo hoos u dhaca iibka ganacsigu ma aha mid waqti kast hal meel taagan hadba waxa uu ku xiran marxalada suuqa uu ka joogo ganacsigaagu waxa macquul in kor ukaco macaashka ganacsiga isla waqti kadib hoos udhacdo hadii uu bato hoos udhaca iibkaaga waxa saameyn weyn uu ku yeelan kartaa in uu sii sacdo ganacsiga ama si laga rabay uu ushaqeeyo waxyaalaha sababi kara iibkaaga in uu hoos udhaco waxa kamida in tayada ganacsiga ay noqoto mid liidata halkaa aad macamiil badan ku weydiid sidoo kale waxa sababi karaa iibiyaha ganacsiga oo aan isku howlin in uu ganacsigu socdo wahsi ha ahaato ama xirfad la aan shirkada waaweyn ama kuwo yar yar ba waa ay soo waajahan hoos udhac iibka lakiin waxay ku xirantahay sidii loo mareeyo hoos udhacaas xalna loogu heli arinta sababtay in uu iibku hoos udhaco ,Waxa jira shirkado badan oo caalami ahaa sababta ugu weyn ee ay u fashilmen in ay tahay iibkooda hoos udhacay xal deg deg ahna aysan samayn.

Koboc aan lagu talo gelin oo aan loo sii meel samaysan

ganacsigu marka la sameeyo waxa lagu bilaaba fekrad iyo fulin kadib markii si qumaatiya lo yegleelo fekradaas oo ay shaqeeyso waxa muhiim ah inlasii meel dhigo qorshe balaaran oo qaxeeya sidii loo kobcin lahaa ganacsiga koboca ganacsiga waxa weye in ganacsigu balaarto adeeg ahaan iyo goob ahaan taas oo ka saacidaysa in uu ganacsigu waaro mudo badan oo sii shaqeeyo kobcintu ganacsigu kaliya ma aha in badeecad badan lagu daro balse waxa weye xadiga uu ku fadhiyey ganacsiga iyo adeega uu hayey oo la balaariyo hadii ay macquul tahay markaa farac iyo laamo kale ama xarumo goob kale kuyaal la unko walow ay arintaa ubaahan tahay ka baaran deg aad uweyn si aysan fashil cusub ugu noqon ganacsiga kobcin la aanta ganacsiga waxa ay sababta in ku ganacsigu hoos usii socdo ilaa marka dambe uu suuqa kabaxo tusaale hadii aad lahayd dukaan yar oo iibiya rashiinka si tafariiq ah isla marka goobta joogtay laga furay bakhaaro

waaweyn oo raashin ku iibiya qiimo jaban waxa hubaal ah in macamishu ka leexan doonto iyago doonaya xuranta weyn in ay kasoo adeegtan nooc kasta raashin uu ku diyaar yahay midaasna ay kunoqoto ganacsigaaga mudo soo jiitamayey hadaba waxa la oran karaa fashilka in aad qeybta ugu weyn aduu lahayd waayo waxa haysatay fursad badan inaad ganacsiga kobcisid lakiin uma aad bareerin inaad kobciso kaliya waxa kusii waday intaa ku bilowday hadaba kobcintu waxay ubaahan tahay in loo sii meel samaysto oo ganacsaduhu kusii tala gala mudada hadii laga gaaro rasamaalka ganacsigu xadigaa uu gaaro inuu ukobciyo kobcinta faa'idooyin badan bay uledahay ganacsiga iyo ganacsadahaba hadii aynu ku hormarno faaidooyinka ay uleedahy ganacsiga horeyso waxay macquul kadhigta inuu ganacsigu waaro mudo badan uu suuqa kusii jiro sidoo kale waxay ganacsiga kusoo xirta macmiil badan kuwaa oo awal xarunta yaraanteda ama aqbalada macamiil badan aan awood ulahayn kobcinta faaidada kale ay ganacsiga uu leedahay waxa weye in ganacsigu helo shaqaalayaal xirfad leh oo ka caawiya mulkilahaa maareynta ganacsiga.

Hadii aynu hal iyo labo kasheegno faaidooyinka ganacsadaha ay uu leedahay kobcinta ganacsiga mid ugu muhimsan waxa weye in ganacsaduhu helayo faaidoyin ama macaash badan marka lala bardhigo ganacsiga aan la kobcin ee yar, sidoo kale sumacada ganacsadaha oo kordhaysa ama la weynaanaysa ganacsigiisa hadii aynu fahamnay kobcinta iyo faaidooyinkeda ay leedahy aynu qeyb ka xusno waxyaalaha diidan ama hor istaaga in uu ganacsigu kobciyo waxaa kamid ah sida kayd la,aan lacag ganacsadaha oo aan lacag u keydin ganacsiga sii u kobcin macaash kasta oo kasoo baxa masruufta

Sidoo kale waxyaalaha hor istaaga inuu ganacsigu kobco waxa kamida nabdiga ama niyada ganacsadaha oo aysan ku weynayn inuu ganacsigiisaas uu kobciyo

Danaha ganacsiga iyo ka qoyska ama qofka oo iska hor yimaada

Waxa jira dano fara badan oo ganacsigu doonayo ama uu rabo in loo fuliyo Sidaas si lamida ganacsadaha ama qoyskiisa dano iyo baahiyo bay leeyihin oo ay rabaan in ay gaaran waxyaalaha keena in uu fashilmo ama caqabad ku noqda in uu sii jiro ganacsiga waxa kamid ah hadii ay iska hor yimadaan labada dan aynu kor kusoo xusnay dhinac doonto haka yimaado saamaynta ama waxa keenay is ka hor imaanshaha waxa ay keenaysa in uu ganacsigii soo af jarmo hadii aynu tasaaalayaal soo qaadano si uu faham keena ay qodobkan fahamsanahy uu u balaarto waxa kamid ah iska hor imaanshaha danaha, sida saxda ganacsigu wuxu leeyahay wakhti mudan in la furo ama laga howl galo sii uu ushaqeeyo sida ganacsiyada badana ay mudan tahay in aroortii xili fiican la furo hadaba hadii ganacsaduhu arimo kale uu maalinkii gelinkeeda hore uu ku mashquulsan yahay oo uusan wakhti uhayn ganacsiga ama uu habeenkii uu howl iyo barnaamijyo kale uu kusoo jeedo maalintii gelin ka hore uu hurdadasi bogto taa waxay ka dhigan tahay in danihii iska hor imaaden midii ganacsiga iyo tan ganacsadaha .

tusaale kale hadii aynu soo qadaano waxa jiro ganacsadayaal reer ama qoysas balaaran leh isla markaan masruufta kuna xiran waxa kasoo baxa ganacsiga hadii uu ganacsigu noqdo mid aad u yar oo aan kaafin Karin in uu dabaalo baahida qoyska taa badalkeeda uu ganacsigu rabo in isaga dib loo meel galiyo halka wax kasta oo kasoo baxa dabka lasaarayo arintaa waxa ay sababtay iska hor imaanshaha danta qoska iyo midii ganacsiga tana waxa ay sababi karta in uu fashilmo ganacsiga oo ay qoysku raadiyaan il kale dhaqaale oo ay ku tiirsanadaan.

Hadaba si danaha laysku waafajiyo waxa muhiim ah in uu ganacsiduhu uu si xeel dheer ulasocdo marxalada uu ganacsigu marayo iyo waxyalaha kadhiman uu doonayo balse kaliya uusan macaash iyo faaido uun uusan

Karaadin sidaa si lamida uu isku miisamo baahida qoyska iyo mid qofka (isaga) iyo waxsoo saarka ganacsiga farqiga udhexeeya.

Goobta shirkadu ku ganacsanaysay oo laga saaro

waxyaalaha ganaciga gondhiga u ah waxa kamida qaacidada 4P sida badan dadka cilmiga ganaciga baranaya ay kudhigtaan jamacadaha ama machad yada cilmiga ganacsiga lagu barto hadaynu kasoo qaadano qaacidada qodobka xiriirka la leh ciwaan hosaadkeena waxa weye [place] oo ah goobta uu ganacigu kuyaal ganaciga waxa aad u muhiim ah in uu ku yaal goob ku haboon isla markaana leh suuq fiican si uu ganacsigu horey ugu socdo badana goobaha ugu badan ee ganacsiga la furo waa suuq ama meel wado ama goob dadku ku nastaan ama meel soo jiidasho leh bulshadu ay kubadan tahay.

Hadii ganacsigu uu helo goob fiican oo ku haboon isla markaana macamiil badan ay ku barto waxa u noqoto barta tilmamta ee ganacsigaas loogu soo hagaago iyado aysan dhib badan iyo raadin dheer aysan ku qaadnayn qofkii doonaya waxa macquul ah in mudo dheer in uu ganacigu goobta ku oolado isla markaana si hagaagsan ugu socdo balse dhibta waxay timaada markii goobti ganacsigu uu ku yaalay laga wareejiyo xarun kale oo cidna ku aqoona loo raro wareejinta haka timaado ikhtiyaar uu ganacsiduhu lahaa oo ah inuu isagu door biday inuu raro ama in lagu khasbay dhinac mulkiilaha goobta ama dowlada oo xarunta aan la jeclaan ganacsi, arinkaa waxa uu ganacsiga ku sabaabi karaa in uu goobta cusub ku fashilmo ama uu iskabi waayo inta uu macamiil cusub ka heelayo kadibna uu sidaa ku kaco.

Hadaba si loo yareeyo arinka ama looga hortago waxa wanaagsan hadii uu awoodo qof ganacsiga bilaabay in xarunta uu ka furayo ay ahaata mid mulkiyadiisa si beri ka maalin isago goobta macamiil fiican ku helay aan looga rarin ,hadii uusan awoodin iinu goobta uu mulkiyadiisa ahato isla markaana looga fadhiyo in uu kaguuro waa in intaa uusan waregin

macamiishisa ugu dhow dhow lasocodsiiya isla markaan boor ama jaantus muujinaya goobta uu wareegayo iyo wakhtiga uu wareegayo ku dhajiya xarunta horteeda.

Isbededeladda suuqa oo aan aqoon fiicaan loo lahayn

suuqa waxa ka dhaca is bedelo fara badan kuwaa oo ay sababi karaan wakhtiyada ama bulshada isbedeladaas waxa ay saameyn taban iyo mid togan ba kuu yeelan karaan ganacsiga waxa daruuri ah qof ganacsiga hagaya ama maamulaya in uu xog ogaal u yahay suuqa iyo xalaada u marayo uuna sii odorasi karaa xalaadaha dhica kara wakhtiyada dhow dhow suuqa iyo samayn caynkee ah oo ku yeelan karaan ganacigiisa hadii uusan ganacsaduhu is bedeladaas waxne kala socon sidaa si lamida aqoon fiican ulahayn si uga faa'ideysan lahaa is bedelada hadii ay yihiin kuwo wanaagsan ama uu uga gashaaman lahaa hadii ay yihiin kuwo dhibaato wata ,waxaa ay keenaysa si kedis inuu ku warhelo isagoo bacaad cidlo ah dhex fadhiya xili ay libdhadu kulu shahay waxan uga jeeda xili uusan ka gashaman Karin balse ay khasab ku noqoto inu uu aqbalo fashilkaas.

Isbedelada waxa ugu waaweyn kuwa ay sababan dabeecada ama wakhtiyada lagu jiro iyo kuwa bulshadu sababan dhamaantoda waxa ay si kala duwan samayan xeel dheer ugu yeelan karaan ganacsiga qofkii cilmi u leh oo xog ogaal u ah waxa uu uga faaideysan kara dhanka wanaagsan isago khatarteeda iska yareyn kara isago ilaahy subxanuhu wata caala talo saaranayaaa isbedelada dabeecada waxa kamida afarta xili sida degaanada ay ugu kala duwan yihiin hadii qofkuu uu og yahay degaanka uu ganacsiga kafurtay xiliyada bulshadu ay ganacsiga si badan ugu xiran tahay baahi badan ay uqabto waxa uu fursad fiican ugu noqonaysa in uu ganacsigu sii socdo hadii lakiin uu moogane ka ahaado debaacada degaanka isbedelaysa iyo suuqa siday samaynta ugu yeelato waxa ay sababaysa ganacsiga oo adeegi haya in macamiil yari awgeed uu is soo xiro.

Isbedelada dhanka bulshada iyo badeecada (alaabta) ay rabaan sidoo kale waxay

saameyn ku yeeshan ganacsiga waxa dhacda in suuqa lasoo geliyey badeecad cusub bulashadu ay badeecada cusub ay u jabaan si ay uhelan midii aad haysay ee suuqa kusii hartay ay sidaas kugu khasaarto hadii aad xog ogaal usii ahaan lahayd waxa xal ukeeni kari lahayd badeecada ku taal ee u muuqata in suuqa kasii baxayso tusaale inaad qiimo ka jaban kii hore ku iibiso ama lafaheeda si aadan khasaaro ugu gelin is bedelka suuqa kusoo socda is bedelka suuqa qaabab kale wuu noqon karaa sida sarafka lacagaha oo isna saameyn kuyeelan kara ganacsiga hadaba waxa muhiim ah ganacsaduhu intaa uu ganacsigiisa xog u hayo in lamida in uu suuqa iyo axwaashisa xog uu ulehay.

Kharashaadka joogtada ah oo sarreeya

waa hubaal si loo helo faaido ama macaash macquul ah waa in uu ganacsigu galaa kharashaad kuwa oo ufududeynaya helida faaidadas ,kharashaadka waxa badanaa loo qeybiya labo qeybood kuwaa oo kala ah kuwo uu ganacsi uu gelayo dhanka maamulka sida bugaagta xisaabinta ,macaash macashka ugalayo mulkii laha sidaa shaaha iyo sharaabka iwm nooca kale kharashaadka oo ah kuwo dhanka waxsoo saarka ama howsha waaana kuwa ugu badan waxaa kamida kharashaadka kirada,xamaaliga alaabta ,korontada ,biyaha ,shaqaalaha,dayactirka agabka halaysma iyo kuwo kale badan oo ku xiran markaa ganacsigu nooca uu yahay.

Kharashaadka badankooda waa joogto kuwa oo ah kuwo ganacsigu maalinle ugalayo ama kuwo bishii laguso dalacaayo, hadaba hadii kharashaadka aysan xad lahayn oo ay aad ubadan yihiin isla markaana aan la xakamayn si macquul ah waxaa ay sababayan in faaidadi ganacsiga sii toos u yareeyan waayo kharashaadka waxa ay toos uga jarmaan ama uga go aan faaidada ganacsiga marka uu ganacsigu kharash badan galo le eg ama ku dhow faa idada waxa ay sababaysa in uu ganacsi uu shiiqmo ama hoos usoo dhaco ilaa ugu damayn fashilmo si looga gashaanto arinkaa waxaa muhiim ah

kharashaadka la galayo la qoro oo si macquula loo fariisiyo wixi aan muhim badan u lahayn ganacsiga layska daayo.

Khatarta tartamayaasha oo sare u kacda.

Suuqa waa goobta kulmisa ganacsadayaal aad ubadan isla markaana midkasta uu doonayo in uu ganacsigisa uu noqdo kan ka dhex muuqda suuqa arinkaa waxa ay dhalisa badartan ama tartan aad u adag kasoo oo ay qeyb ay ku guuleysato qeybna aynu ku fashilmato wana arin joogto ah tartanka ganacsatada dhex yaal balse ku kala duwan samayn iyo khataraha ay yeelan karaan.

Ganacsata qeyb baa xooga saara carcar badan lasoo baxa sidii ay suuqan ula wareegi lahayeen macamiil badan ay uheli lahaayen arinkaa waxaa uu sameyn weyn ku noqon karaa ganacsiyada kale waxa ay sababta in ay iyanguna tartanka dhinac kasoo galaan ama ay ka haraan, hadii ay ka haraan waxay kadhigan tahay ganacsigooda in aayo dambe ama ifafaalooyin wanaagsan uusan umuuqan.

Tartamayaashu badana waxay isticmaalan xeelado kala duwan si ay u hantan macamiil xeeladaha waxay xajiin iyo xanaf aan dhamaan ku noqota ganacsiga la ayniga ah ee lakiin aan itaal u hayn in uu isna talaabooyin degdeg qaaado khatar dhanka tartamayasha kasoo wajahday waxay sababaysa in ganacsigii si qumaati ah suuqi ugaso xirmo ugu dambayn uu u wajahdo fashil uusan raali ka ahayn.

Runtii aadbay ugu fiican tahay dhanka bulsho in la helaayo ganacsadayaal tartamaya si bulshadu u hesho adeeg iyo badeecad tayo leh oo qiimo macquul ahna lagu helaayo hadii aysan midaa jirin waxa dhacaysa in hal ganacsade ama hal shirkad suuqa u xirnaado sida ay jeceshahy ay u dhaqanto iyado danteeda fiirinaysa midaa o sababi karta in dhibaato ama culays bulshada soo wajahdo.

Hadaba tartamayaashu markasta waa ay so galaayan suuqa waana waxa ku dhisan hab ganacsiga bulshada sida ugu haboon ee uu ganacsaduhu ku yareyn karo khatarta kaga imaan karta tartamayaasha waa in uu marka hore xooga saara tayada waxa uu iibinayo ama uu soo saarayo sidoo kale uusan ku iibin qiimo aysan bulashadu ximili Karin isago maqsadkiisu yahay faaido badso ,had iyo goor waa in uu lasocdo qiimaha ay kajoogto maciishadiisu suuqa sidoo kale waxa laga marmaan ah ganacsigu inuu yeesho macaamiil daacad u ah isaga oo uu isku haleyn karo.

Isbedel ku yimaada qofka ama qoyska

nolosha wax kasta wey is badelaan oo wax joogto ma ahaan doonan sidaa si lamida bini aadamka hadba marxalad buu ku sugan yahay ama xaalad ka duwan midii shalay xaaladaa waxay qeyb ka qaadata hab fekerka qofka iyo ficilada uu samaynaayo hadii qofku markuu ganacsiga uu bilaaabayey uu hayey firfirconi iyo xamasad badan himilooyin waweyn uu ka lahaa waxa dhacda in mudo kadib qofkii is bedelo oo uu xamasaad jabo isla markaana is bedelkaa uu sabab unoqdo in ganacsigii xawaarihi wanaagsana uu kusocday yaraado ilaa marka dambe qofku uu go aansado in uu joojiyo.

Isbedel kasta oo ku yimaada ganacsadaha waxa ay xiriir toosa la leeyihin hab socodka ganacsiga hadii uu ganacsaduhu rabo inu xeelad ,xoog iyo xoolo wixi uu hayey ganacsiga gasho waxa ay suurtagalisaa in miro dhal fiican laga arko daadal badan iyo juhdi kadib hadii uu ganacsaduhu uu xanuunsado ama cimriyo (da) oo u awood dareeyo cid booskii buuxisa la waayo waxaa sababaysa in ganacsigii gaabis weyn kudhaco ilaa ugu dambayn gaabis jiitama kadib uu fashilmo.

Dhanka qoyska iyo isbedelka kadhaca siduu samayn ugu yeelan karo, hadii ganacsadaha qoyskiisa ay soo wajahdo arimo muhim oo laga fursan Karin in wax weyn laga qabto waxa muhim ah ganacsiga maal ama xoolo badan

lagasoo baar gooyo ama isaga oo dhan la iibiyo si duruufta weyn oo reerka soo wajahday loo asturo.

Isbedela ku dhaca qofka iyo qoyska waxa ay si cad uga muuqdan ganacsiga kaliya ma ahn dhinac taban sido kale dhinac waxtar way kuyeelan karaa sidaa miisaniyad hor leh oo reerka soo gasha kadib ganacsiga lagu kabo lakiin badanaa ganacsiga is bedeladu qof ama qoys waxa ay ku keenan in uu fashilmo ama uu hoos udhaco.

Maalgelin faro badan oo si bila xisaabaha lugula dul kufo

Maal gelintu waa waxyaalaha ugu muhiimsan marka ganacsiga la bilaabo iyo markaa uu heer fiican ba marayo isla markaana ka qeyb qaadanaysa kobcinta iyo horumarinta gacansiga.

Maal gelin labo hab way noqon kartaa maalgelin gudaha ka timid iyo maal gelin dibada uga timi ganacsiga maal gelinta gudaha uga timi ganacsiga waa in mulkiilahu lacag gaar u ahayd uu kudaro ganacsiga ama xubno ganacsiga kuwada jira lacag ay iska soo aruuriyen ay kusoo dareen ganacsiga maalgelin noocan way u fiican tahay ganacsiga ,tan labaad waa maal gelin dibad uga timi waa in ganacsaduhu uu soo dayn qaato lacag si uu ugu balaariyo ganacsiga haka soo deyn qaato qof ama bangi sidoo kale waxay noqon karta deeq in si bilaash ah lagu taakuleeyo ganacsadaha.

Maal gelinta iyadoo ay sidaa muhim u tahay hadana hadii xadkeeda la dhaafiyo oo si aad u badan loo dalbado maalgelin dibada ah sida dayn waxay rakaadin ku noqota ganacsiga waayo ganacsigu waxa uu ku socda xisaab miisaman hadii laga badiyo xadiga uu mudna in lagu maalgeliyo waxa kadhalanaya khasaaro iyo culays balaaran oo so wajaha geedi socodkiisa.

Maal gelinta faraha badan ee ganacsiga waxay buuq ama welwel ku abuuraysa mulkiilaha isago welwel badan kaqaba in uu khasaaro lacagtaas hadii ay dayn tahay in loo raaco ay howl kale furto welwelkaa fara badan

wuxu hoos udhigaya firfircoonida ganacsadaha iyo in uu si degan uu fuliyo ganacsiga maareyntiisa iyo horumarintiisa.

Si loo yareeeyo maalgelinta faraha badan ee aan loo meel dayin waxa muhim ah ganacsaduhu in aad u kala yaqaan wakhtiga mudan in ganacsiga la maal geliyo sidoo kale waa in uu la tashada cid aad ugu xog ogaalsan cilmi fiican uleh maal gelinta ganacsiga iyo xadiga lacag ee markaa ganacsiga ku kaboon in lagu maal geliyo.

Daymaha oo yaraada

Ganacsigu labo qaab buu iibka usameeya labadaa qaab waxa weeye hab uu ganacsigu lacag cad uu ku badalanayo maciishada iyo qaab dayn ahaan iyadoo ganacsidahu iyo macamiilku ku heshiiyaan in wakhti cayiman uu ku bixiyo lacagta daynta.

Dayntaa faaido bay uleedahay ganacsiga waa marka kowaad ganacsigu wuxu helayaa suuq fiican isla markaa alaabtii kuu iibsanto sidoo kale ganacsigu wuxu helayaa macamiil badan oo ku xiran waayo waxa u jaanis u siiyey in ay badeecad helaan iyagoo aan lagu xujeyn lacag cad in ay isla markaba bixiyaan balse wakhti lasiiyo si ay usoo diyaar garooba xili balanta iyado dhamaystiran ay u keenan iyadoo oo sida tahay hadana waxa jira ganacsato qorshahooda ku dara in aysan dayn bixin ha yaraato ama ha badnaato kaliya badeecadooda kuu iibiya lacag cad oo gacan laysku waydaarsanayo markaa taasi waxay sababta in ganacsigii suuqi kasoo xirmo macamiil badan uu qorshahaas ku waayo waayo macamiil kasta wuxu aadayaa ganacsade hadii xaaladu kuyara kakan tahay dayn siin kara oo aaminayaa isla markaana wakhti siin karaa si uu jaanis ugu helo bixinta dayntaas , hadii uu ganacsaduhu uu dayn bixintiisu ay aad uhoosayso waxa ay ka dhigan tahay macamiishisa sidoo kale way yartahay dayntu waa qeyb kamida socodsiin maciishada sidoo kale waa hab kamida hababka soo jiidashada macamiil badan ganacsiga diida inuu dayn bixiyo ugu dambyn waxa dhacaysa in uu macamiil wayo kaliya qof soo dul dhac ah inu fisho.

Waxa wanaagsan ganacsaduhu isago maskax kudaraya in uu dayn macquul bixiyo macamiilka uu ku kolsoon yahay mudo na ku xirna, balse uusan markasta filan lacag cad in uu macmiilku wato sidaa o kale daynta aan xadka lahayn si garaad kujiro loo maareyn waxay sababta in uu ganacsigu kaco ama hantida ganacsiga ay dayn kuwada maqnaato iyadoo labada arin laga duulayo waxa haboon in ganacsadahu dayn macquul oo si feejigan iyo shakhsi la aamini karo uu bixiya.

Maamul xumo soo wajahda ganacsiga

maamul ganacsi waxa weeye in ganacsi si quman loo la socdo xaaladiisa iyo halka uu marayo isla markaana loo maamulo hanti wixii uu leeyahay si aysan u dayacmin maamul ganacsi oo wanaagsan labo hab waa lagu gaari karaa tan kowaad waa cilmi qofka oo cilmi wakhti u hura si isagoo cilmi maamulka ganacsiga ka dheregsan uu howshiisa u galo tan labaad waa khibrad waa qofka oo mudo kasoo shaqaynaayey saaxada ganacsi.

ganacsi kasta waxa uu ubahan yahay maamul iyo maareyn si uu ugaaro guulo macquul ah ,hadba inta ganacsiga maamulka iyo mareyntiisa ay wanaagsan tahay buu horu socod leeyahay faaido iyo miro dhalna laga fisha hadii ganacsigu uu waayo maamul wanaagsan waxa loo badiyaa in uusan wakhti badan sii jiri doonin maamul xumada ganacsiga waxa ay soo dadajisa in uu fashilmo ganacsigu sababaha keena aad bay ubadan yihiin hadii aynu dhowr kasoo qaadano sababaha keena maamul xumo ganacsi waxa kamid jahli qof oo aqoon cilmi iyo mid waayo aragnimo toona ulahyn ganacsiga sidoo kale waxa kamid caajis qofka si howl karnimo leh aan uu maamulin ganacsiga sidoo o kale waxa kamida hadii dadka maamulka ganacsiga ku shaqo leh ay kabadan yihiin qof ama labo qof waxaa dhacda in howshii laysku daawado oo midba mid kale uu ku haleeyo halkaa ayna ka dhalato maamul xumo.

Cawaaqibta xun ee laga dhaxli karo maamul xumada waxa ay awalan iskuguso biyo shuban in ganacsigii fashilmo oo uu sidaa ku kaco hadii ay taasi dhicin ganacsigu waxa uu soo wajahaya dhibatooyin badan kuwaa oo kasoo horjeed ku ah koboca, horumarka ganacsiga sidoo kale waxa hoos udhacaysa sumcada uu bulshada ku dhex lahaa ganacsigu.

Maamul xumada ganacsiga waa qodobka ugu weyn ee ganacsiyada fashiliya qaarada Africa sida badan ganacsiyada la sameeyo waxa ay u kacaan maamul xumo iyado aysan bulashadu lahayn waayo aragnimo ganacsi ee hore sidoo kale aysan diyaar u ahayn in ay bartaan maamulka ganacsiga waxa jira ganacsiyo badan oo la sameeyey balse sanad gudahiisa ay dhamaan kacaan hadii aad warsatid qofka ganacsigu ka fashilmay waxa ugu badan ee u jawaabaya waa in maaraynta iyo maamulkiisa ku baahday oo waji uusan filanayna uu kala kulmay.

Hadii ganacsaduhu inta uusan bilaabin ganacsiga uu xog fiican aruursado oo ku saabsan maamulka ganacsiga waxa ay raandhis dambe oo fiican ku yeelan doonta ganacsiga iyo in sidii uu rabay ama ka

Sababaha keena in uu ganacsigu guuleysto

Ganacsi guuleysta sii loo gaaro waxay ubaahan tahay dulqaad iyo dadaal badan kasoo, o ka soo fulaya ganacsadaha iyo cida la shaqeynaysaa ma sahlana in si yaro fudud loo gaaro ganacsi guulaysta iyado howl iyo dadaal badan loo marin qormadan kooban oo ciwaankeeda kor inooga muuqdo waxa aynu kusoo qaadan doona sababaha keena ama sahlayaa in uu ganacsigu guuleysto waxaana kamid ah.

Iska ilaalinta koritaanka iyo kobcinta degdega

Ganacsiga inuu kobco waa mid aad ugu muhiimsan ganacsadaha, waxa ayna kamid tahay waxyaalaha oo ku han weyn yahay in uu gaaro wadiiqooyin badan wuu umara in uu ganacsigiisu koro.

Kobcinta degdega waxa ay fashilisa qorshaha uu lahaa ganacsiga waxa ayna hoos udhigta tayada iyo xooganaanta ganacsiga hadii la sameeyo kobcin degdega iyadoo ganacsigu uu curdin yahay waxa ka dhalanaysa saameyntii wanaagsanayd ee laga filanaayey lidkeed in ay kasoo baxdo waxa muhiim ah in ganacsaduhu iska ilaaliyo kobcinta degdega waana in uu si miir leh uu ulasocdo xiliga uu ubaahan yahay ganacsiga in la kobciyo. Arinta waxay ka qeyb qaadanaysa in uu ganacsigu guuleysto si degan uu socdo.

Kor dhinta tayada si joogto ah

tayada waa shayada ugu muhiimsan ee ganacsiga kadhiga mid guuleysta isla markaana laga heli karo macaash iyo faido fiican waayo tayada oo xooga la saara waxa ay sababysaa in uu ganacsigu yeesho macamiil badan waxana muhiim ah in sii joogto looga war hayo tayada ganacsiga iyo halka ay marayso markasta ay daruuri tahay in kor loo qaado waa in loo qaado tayada si guud waxa aynu kusoo koobayna sadex qeybood

Tayada wakhtiga (time quality)

macamiishu waxay daneeyaan ama door bidaan in dalabkoodi sida ugu dhakhsiyaha badan uguna macquulsan u helaan hadii ganacsiga caga jiid yahay oo dalabkii wakhti qaadanayo ilaa uu raagsado qofkii loo adeegayey macamiilka dhaliisha isago uu sheegin buu go aan degdeg qaadan karaa kaaso ah maalin dambe inuusan goobta usoo iib doonan Shayga ugu qaalisan ee dadku ku xisaabtamayan waa wakhtiga oo hadii qof uu alaab u doonto suuqa dukaan kuso hagaago intuu iska daba wareegayo alaabtii codsigeeda iyo laso wareegideeda uu ku jiro haday dhowr saac kaso wa raagto marka dano kale uu uu qofku lahaa baa ka dayacmaya waxa uuna ka qoomamaynaya dukaankaas wax ka iibsigiisa haduusan habaar ugu darin Si aysan arinka u dhicin ganacsaduhu waa in uu dadaala wakhtigana u ilaaliya dadka uu la macaamilayo hadii culays iyo saxmad jirto raali gelin ka bixiya si uu macamiilka u dareemo in la xaal ogyahay oo u sabro.

Tayada qiimaha (price quality)

Dadka alaabta iibsanaya badanaa waxay fiiriyaa qiimaha oo suaasha ugu horeysa ee ay weydinayan waa (waa imisa) hadii ay arkaan in qiimaha alaabta saraayo durba waxa is oranayan dukaanka sicirkiisu wuu sareeya salaama baana lagugu dhaafaya.

Qiimaha si aynu ufahamno aynu sadex u qeybnimo Kan kowaad Qiimo aad u sareeya kasoo ay badana ganacsatu umoodan inay dan ugu jirto balse taas lidkeed ay hadhow ka arkaan, qiimaha sare waxa uu keensada in alaabtii kugu raagto macmiishi midkii maalin waxka iibsada uusan maalin kale kuguso noqon sidaas owgeed ma fiicana in aad qiimo fowqal caqliga dul saartid badeeca ama adeega aad qabanyid

Kan labaad qiiimo aad u hoseeeya kan marka ay ganacsatadu sameeyanayaan ujeedadu waa suuq fiican hel ganacsatada kale kula tartamaysa macamiisha kasoo jiido lakiin markii ay nidamkan isticmalaan ilaa wakhti kadib baa dhibtiisa soo baxda waayo ganacsigu kharash uu

galayo iyo dakhliga uu soo saarayo ay kala badanaya waana la arkaa alaabtii oo lafaheedii uun soo saarayso halkii faido laga filaayey

Kan sadexaad waa qiimo dhexdhexaad ah kan ganacsaduhu wuxu isku miisamaya macamiilka waxa wuu u awoodo isna faido ugu jirta sidoo kale heerka suuqa waafaqsan Waana kanugu fiican ee istarajiyad ahaan loo baahan yahay in la isticmaalo iyadoo aqoon xeel dheer iyo baaritaan suuq lagu daraayo.

Tayada alaabta (product quality)

waa muhiim alaabta tayo leh dadka in laga iibiyo macamalaat fiqiga diinta ee ganacsiga la xiriira lagu sheegay ganacsaduhu inuu iibiyo alaab tayadooda wanaagsan tahay oo aan shaxaad iyo khashkhashaad ku jirin alaab la hubo waxtarkeeda, waxa laga sameeyey, mudada la isticmaali karo iyo sidoo kale alaab caynkeeda ama waxyalaha ayka kooban tahay ay udhameystiran tahay oo aan tayo naaqus ah laga dhigin Bulashada wakhtiyadan dambe si wacan bay ugu baraarugsan tahay tayada, hadii wakhti lasoo maray oo tayo alaab waxla yiraahdo xog ogaal badan loo lahayn jirin hada qofka miiga jooga hadii alaab cajabin waydo ama isticmaalkii uu rabay uu ka waayo oo cilad degdeg la timaado Alaabta ganacsadahaas hayo tayo fiican maleh buu oran cid kastoo oo u yaqaan wuu gaarsiin ilaa marka dambe ay suuqa u gasho tayo xumo

Sidaa awgeed tayada alaabta waana in ganacsaduhu ka dhiga muhiimada kowaad Si uusan oo ugu siifoobin tayo xumo alaab qaaliya o wakhti kooban isticmaalkeedu ku egyahay

U sameynta qorshe ganacsigaaga

Ganacsadaha waxa muhiim u ah inuu daraasad iyo baritaan ku sameeyo suuqa si uu u gaado xaalada iyo baahiyaha ka jira, waxyaalaha baritaan u baahan waxa kamida dadka macamiisha waxa ay rabaan ama daneynaayan

inay iibsadaan xiliyada kala duwan waxa kaloo muhim ah inay ogaato shirkada kale suuqa ku jira awoodaha ay leeyihin iyo baahi bulsho ee aysan daboolin oo ay gaabis ka yihiin

Kadiba markaa xog iyo macluumaad ka heshida baritaanka waxad bilaabysa qorsheynta nidaamki ama istraatiijiyadii uu ganacsigaagu mari lahaa waxa la ogyahay ganacsiga bila qorshe wuxu hadba wajaha xaalad kedis oo uusan fileyn taaso dhaxalsiisa inuu hoos udhac ku yimaado ugu dambayn suuqa ka baxo Qorshe dajintu qabab iyo meel badan bay kasoo galaysa ganacsiga qorsheynta kharashaadka iyo qorsheynta nidaamka adeeg qorsheynta nidaamka maamulka qorsheynta habka la tacaamulka iyo xiriirka maacamiisha waxa la huraan ah hal abuuraha ganacsi ama maamulku inuu dajiyo jihada uu usocdo ganacsigiisu oo uusan noqon dooni bad saaran oo ay meel ku wajahan tahay la garanayn dabayluhu hadba dhinac u tuureyn ilaa marka dambe ay dagto

Hadaynu tusaale yar usoo qadaano qorsheynta inagoo wakhti ku salaynayna waxa aynu u qaybin karnaa Qorshenta ganacsiga xiliga la joogo (current business plan) ama istaraatiijada wakhtiga gaaban Waxa ka mida alaabaha uu ganacsiga soo saarayo bisha, noocoda, tiradooda, tayadooda shaqaalaha ku howlan mushaharkooda habka suuqeynta alaabtan cusub hadii loo bahan yahay shaqalo dheerad ah iyo istaraajiada kasta oo uu ganacsiga mudo kooban rabo inuu ku fuliyo si uu u gaaro iyo horumar iyo kobac

Qorsheynta ganacsiga mustaqablka (future business plan) ama istaraajiyaada wakhtiga dheer Nidaamka waxa mulkiiluhu diirada saaraya yoolka fog oo uu rabo inuu ganacsiga gaaro badana waxa lagu cabira hal sano wixii ka badan sidaa hadii uu ganacsiga rabo inuu farac (branch) sameeyo hab uu marayo In meelaha ugu mudan ee laga sameyn karo hadii ganacsiga qaabkiisa la badalaayo sida shuraako inuu noqdo ama xubin cusub kuso korodho mulkiilayasha sida loo dooranayo, iyo yoolal kale oo badan kuwaso la xiriira ganacigu qaabkuu yahay

Oraah ayaa ahayd (Failing to plan is to planning to fail) hadii aad ku guul daraysatid inaad qorshe dajiso waxa qorsheysay guuldaradaada, markaa ganacsadu waa inuu uusan laab la kac ku galin suuqa balse qorshe fadhiya uu saldhig uga dhiga ganacsiga hadhowna qiimeyn ku sameya qorshihiisii iyo howlaha fulay farqiga u dhaxeeya...



Marka hore ilaahy baa mahad aan lasoo koobi Karin iska leh isaga ayaa ii suurgaliyey inaa dhameystiro dhigahan kooban nabigeena suuban naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaato Sido kale waxa u mahadcelinaya qofkasta akhriyey buugan wakhtina u huray si akhriskiiisa dhiganahan u usoo afmeeri lahaa

Qoraaga buuga

Qoraha buugan waa faarah ahmed abdi ahna arday dhigta cilmiga xisaabadka ganacsiga iyo maaliyada (accounting and finance) heerkiisa labaad master degree 2022 qoraha wuxu dhiganahan ku irdo furey hayaankiisa qoraanimo isago wakhti badan isku howlay helid macluumaad la xiriira ganacsiga ganacsigu waa majaal mudan in dhiganayaal badan laga qoro si ay bulshada uga baxdo ama u yaraato baahida ay uqabto fahamka maamulka ganacsi iyo maareyntisa ugu dambeyn buugan waa buugi iigu horeeyey ee aan qoro binu aadan kana hawlqabad kasta oo uu sameeyo qabyo iyo dhaliil waa u lama huraan sidaad darted akhriste wixii dhaliila ee aad ku aragto habka mowduucyada iyo qoraalka buuga ha la ii cudurdaaro wixi kale talo iyo tusaale ah

Email: faaraxahmed10@gmail.com

Wa bilaahi tawfiiq

Wasalaamu calaykum waraxmatulaahi wa barakaatu

[illegible]

DHAMAADKA BUUGGA